

Xarunta Guriga Boston (Boston Home Center) iyo [Allston-Brighton CDC](#) waxay iska kaashadaan bixinta **Brograamka Milkiyadda Guriga Allston-Brighton (Allston-Brighton Homeownership Program)**. Brograamkaan cusub waxaa lagu suurto geliyay maalgelinta manafacaadka bulshada kana soo jeeda horumarinta [Allston Yards](#).

Brograamka Milkiyadda Guriga Allston-Brighton wuxuu ka kooban yahay labo qeyb:

1. Lacagta la hormariyo (downpayment) iyo kaalmada kharashka lagu soo afjaro iibka (closing cost assistance) ee kuwa marka ugu horeyso guri ka iibsada Allston-Brighton
2. Hagaajinta siistemka kululeynta ee loogu talagalay waayeelka daggan Allston-Brighton.

Lacagta Hormarinta/Kaalmada Kharashka Lagu Soo Afjaro Iibka ee loogu talagalay Iibsadaha Guriga Marka Kowaad ee Dakhli Ahaan Xaqa u Yeesha in uu Guri ka Iibsada Allston-Brighton

- Haddii aad tahay iibsade marka kowaad raba in uu guri ka iibsado Allston-Brighton, waxaa dhici karto in lagu siiyo **ilaa \$50,000 oo ah kaamada maaliyadda la siiyo iibsadeyaasha guriga marka kowaad ee dakhli ahaan u qalma**.
 - Kaalmada maaliyadda waxaa loo isticmaali karaa sida lacagta la hormariyo iyo kharashka ku baxa soo afjiridda heshiiska.
 - Kaalmada maaliyadda waa deyn gadaal loo dhigay oo dulsaarkeeda yahay eber, macnaha ma jirto lacag aad bixin doontid ilaa aad iska iibisid, dib u maalgelisid, ama aadan ku nooleen gurigaada ku yaal Allston-Brighton.
 - Iibsadeyaasha guryaha waa in ay deyntooda guriga (mortgage) u adeegsadaan mid ka mid ah [Deymiyeyaasha Ka Qeybqaata \(Participating Lenders\)](#) Xarunta Guriga Boston.
 - Iibsadeyaasha waa in ay la kulmaan dhamaan [sharuudaha kaalmada maaliyadda](#) ee Xarunta Guriga Boston (Boston Home Center).
- [Waxaad brograamka ka soo dagsataa](#) bogga internetka Xarunta Guriga Boston (Boston Home Center):

- Marka aad soo dirtid ama aad qacanta ku keentid, fadlan waxaad kor ku gortaa **Allston-Brighton Program (Brograamka Allston-Brighton)**.

La xariir Allston-Brighton CDC si aad u heshid macluumaad badan homebuy@allstonbrightoncdc.org ama wac telefoonka 617-787-3874, khadka 35.

→ **Waayeelka Allston-Brighton Waxaa u Dhagaalooba Kaalmada Hagajinta Siistemka Kuleylinta**

Waayeelka daggan Allston-Brighton waxay qaadan karaan **\$8,000 oo deeq ah** si ay isaga baddalaan siistemka kululeynta ee jira ugu yaraan 12 sanno, ama aan shaqeynin.

Arjiileyaasha u qalma waa in ay:

- Jiraan lexdan (60) sanno ama ka badan; iyo
- Shaqeystaan in ka yar 120% Dakhliga Dhexe Dagmada (Area Median Income) [fiiri jaantuska hoose]
- Ahadaan milkiile-daggan guri ku yaal Allston-Brighton
- Milkiileyaasha guryaha waa in ay la kulmaan dhamaan sharuudaha brograamka Dhaqaalaha Waayeelka (Seniors Save) ee ku qoran halkaan:
 - Waa in ay daggan yahiin hal qeyb - oo ka tirsan afarta qeyb hantida
 - Waa in aan lagu lahayn canshuurta Hantida Maguuraanka Boston (Boston Real Estate)
 - Waa in aan lagu lahayn lacagta Biyaha iyo Bullaacadda Boston (Boston Water & Sewer)

La xariir ESAC emailka kpresse@esacboston.org ama wac telefoonka 617-524-2555 si aad u heshid macluumaad dheeraad ah iyo si aad u buuxisid arjiga loo adeegsado brograamka Dhaqaalaha Waayeelka Allston-Brighton.

**Jaantuska Xaq u Yeelashada Dakhliga
Dhaqaalaha Waayeelka Allston-Brighton**

Tirada Reerka	120% Dakhliga Dhexe Dagmada
1 qof	\$101,500
2 qof	\$116,000
3 qof	\$130,500
4 qof	\$144,950
5 qof	\$156,550
6 qof	\$168,150